

**MAS'UULIYADDA IYO XUQUUQDA AAD LEEDAHAY EE
CAAFIMAADKA (MEDICAID, BADGERCARE PLUS, FAMILY PLANNING ONLY) / FOODSHARE
YOUR RIGHTS AND RESPONSIBILITIES FOR HEALTH CARE
(MEDICAID, BADGERCARE PLUS, FAMILY PLANNING ONLY) / FOODSHARE**

XAQ WAXA AAD U LEEDAHAY IN QORAAL LAGUGU WARGELIYO oo hay'addani kuu soo dirto mar kasta oo la qaado talaabo lagu joojinayo ama lagu yareynayo (Medicaid, BadgerCare Plus, Family Planning Only Services) ama FoodShare. Talaabooyinka intooda badan, waxaa lagu soo dirayaa waraaq qoraal ah 10 cisho ka hor inta aan talaabo lagaa qaadin.

WAXA AAD CODSAN KARTAA IN LA QABTO DHAGEYSI DHEXDHEXAAD AH OO KU SAABSAN LACAGTA AAD KA HESHO FOODSHARE haddii aad nagu diidan tahay talaabada ay hay'adani qaaday. Waxa aad qoraal ku codsan kartaa in lagu qabto dhageysi ama aad iman kartaa xafiiska hay'adda ku qoran wargelinta lagu diray. Codiga FoodShare, hay'adda codsiga dhageysiga afka ayaad uga sheegi kartaa. Waxa kale oo codsi qoraal ah u soo diri kartaa Department of Administration, Division of Hearings and Appeals, PO Box 7875, Madison, WI 53707-7875 ama soo wici kartaa 608-266-7790. Sida uu dhigayo sharciga Wis. Admin. Code § HA 3.03, waa in codsigaagu xafiiska soo gaaraa: (1) 45 cisho gudahood laga bilaabo taariikhda dhaqan galka go'aanka hay'adda ee caafimaadka (2) 90 cisho gudahood xilliga u dhaqangalka ee go'aanka laga gaaray FoodShare, haddii aadan ku raacsaneyn isbedelka ay ku sameeyeen macaashkaaga.

Xaaladaha intooda badan, haddii codsigaaga dhageysiga uu soo gaaro Division of Hearings and Appeals ka hor inta aan la gaarin taariikhda dhaqangalka go'aanka hay'adda, lama joojinayo lamana yareynayo macaashka aad ka hesho hay'adda. Macaashkaagu wuu sii soconayaa, ugu yaraan, ilaa aad go'aan racfaan ah ka qaadata. Mudadaas, haddii isbedel kale oo aan xiriir la laheyn ii dhaco, waxaa suurogal ah in macaashka aad ka hesho ee caafimaadka iyo FoodShare uu isbedelo. Haddii uu isbedel kale dhaco, waraaq cusub ayaa lagu soo dirayaa. Haddii aadan ku qanacsaneyn go'aanka dhageysiga, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan oo waxa aad codsan kartaa dhageysi kale. Haddii dhageysiga lagu gaaro go'aan oo la yareeyo macaashka aad qaadata, waa in aad dib u bixisaa lacagtii aad qaadatay mudadii racfaanka aan go'aan laga gaarin. Waxa aad weydiisan kartaa in lagaa joojiyo lacagta inta go'aan laga gaarayo.

ADIGA AYAA ISU DOODI KARA AMA WAKIIL AYAAD SAMEYSAN KARTAA dhageysiga ama qareen, saaxiib, cid kale oo aad dooratay ayaad u qabsan kartaa inuu ku matalo. Lacagta qareenku ma bixineyso dawladdu. Hase yeeshee, Adeeg xaga sharciga ah oo lacag la'aan ah ayaad heli kartaa haddii aad ka soo baxdo shuruudaha.

Haddii adiga ama qofka ku matalaya uusan imaan dhageysiga cudurdaar la'aan, racfaankaaga waxaa loo qaadanayaa inaad ka hartay racfaanka waana la baabi'inayaa.

HADDII LAGU SIIYO GARGAARKA CAAFIMAADKA, waa in aad la shaqeysaa hay'adda lacagta ilmaha u soo jarta, haddii aanay jirin sabab aad ku diido inaad la shaqeyn. Shaqaalaha ayaa ku siinaya macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan la shaqeynta lacagta ilmaha loo jaro. Xitaa haddii aan lagu ogolaan caafimadka, waxaa lagaa caawin karaa sidii lagu kordhin lahaa lacagta ilmaha loo jaro. Macluumaad dheeraad ah waxa aad kala xiriiri kartaa hay'adda lacagta ilmaha loo jaaro.

HUBINTA KOMBIYUUTARKA: Haddii aad shaqeyso, mushaharka aad noo soo gudbiso waxaa lala bardhigayaa kan aan ka helno goobta shaqada ee Department of Workforce Development. Internal Revenue Service, Social Security Administration, Unemployment Insurance Division iyo Department of Transportation oo lala xixiirayo si ay noogu oo sheegaan dakhliga shaqada kaa soo gala.

HADDII LAGUU OGOLAADO BARNAMIJKA CAAFIMAADKA, mar kasta oo aad booqato dhakhtar qaata BadgerCare Plus ama Medicaid waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad tusto kaarka ForwardHealth. Adeegyada qaarkood, waxaa suurogal inaad lacagta dhakhtarka ku darto. Lacagta aad bixineyso waxaa ay ku xiran tahay nooca adeegga iyo kharashka ku baxaya. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegaya haddii lagaa doonayo inaad lacag bixiso ama haddii adeegga lagu qabanayo uu ceymisku bixinayo. Haddii aad su'aal ka qabto ceymiska, la soo xiriir Adeegga Macaamiisha ee 800-362-3002.

HADDII AAD QAADATO MACAASH AMA ADEEG, waxaa waajib kugu ah inaad raacdo sharciyadan:

- **HA** bixin maclumaad been ah ama ha qarintu macluumaadka si aad u waddo si macaashku kuugu sii socdo.
- **HA** iibin ama hana ku bedelan macaashka lagu siiyo ee FoodShare (Kaarka QUEST) ama kaarka ForwardHealth.
- **HA** ku sameyn wax isbedel ah kaarka si aad u hesho macaash dheeraad ah.
- **HA** u isticmaalin macaashka FoodShare inaad ku iibsato alaabada aan la ogoleyn sida tubaako iyo khamri.
- **HA** isticmaalin kaarka QUEST iyo Forward Health oo qof kale leeyahay.

DIGNIINTA CIQAABTA EE FOODSHARE

Qof kasta oo qoyska ka tirsan oo si bareer ah u jabiya mid ka mid ah sharciyada soo socda waxaa laga mamnuucayaa FoodShare muddo 12 bilood ah ka dib marka uu jabiyo sharciga, 24 bilood marka labaad ee uu jabiyo sharciga ama marka ugu hereysa oo ku iibsado maandooriyayaasha iyo in si gebi ahaanba laga joojiyo marka sadexaad ee uu jabiyo.

- Bixinta maclumaad been ah ama qarinta macluumaad been ah oo sii waddo si macaashku kuugu sii socdo.
- Wax ku bedelashada ama iibinta macaashka FoodShare.
- U isticmaalka macaashka FoodShare inaad ku iibsato alaabada aan la ogoleyn sida tubaako iyo khamri.
- Qof kale oo aad FoodShare uu leeyahay aad isticmaasho, kaarka aqoonsiga ama aqoonsiyo kale.

Iyada oo hadba ku xiran qiimaha inta la isticmaalay, waxaa kale oo lagu ganaaxi karaa ilaa \$250,000, xarig ilaa 20 sano ah ama labadaba. Maxkamadda ayaa sidoo kale kaa mamnuuci karta FoodShare Wisconsin 18 bilood o kale oo dheeraad ah. Si joogto ah ayaa lagaaga joojinayaa haddii lagu helo inaad si sharci daro ah u isticmaashay macaashka FoodShare oo gaaraya \$500 ama ka badan. Laguuma ogolaanayo inaad ka qeyb qaadato FoodShare Wisconsin muddo 10 sano ah haddii lagugu helo inaad hadal been abuur ah sameysay ama aadan ka run sheegin aqoonsigaaga iyo halka aad degan tahay aad macaashka lalaaab uga dhigto. Dadka lagu helay dambiyada culus ama ku jira kor kala socoshada looma ogola in ay ka qeyb qaataan FoodShare Wisconsin. Waxaa laga yaabaa in dambiyada dheeraad ah lagugu qaado sida ay dhigayaan sharciyada dawladda dhexe.

Haddii aad ku iibsato ama aad ku bedelo macaashka FoodShare waxyaabaha maandooriyayaasha ah, waxaa lagaa mamnuucayaa barnaamijka FoodShare muddo 2 sano ah marka ugu horeysa marka xigana waligaa ayaa lagaa mamnuucayaa. Haddii aad wax ku bedelato (ku iibsato ama gadato) hub ama waxyaabaha qarxa, waligaa ayaa lagaa mamnuucayaa.

RE: Federal Regulations	7 CFR 273, 42 CFR 431, 42 CFR 433, 42 CFR 435
Wisconsin Statutes	49.22, 49.45, 49.49, 49.95

Warbixinta Takoor La'aanta USDA

Hay'adan waxaa ka manuuc ah ku takoorida kus alaysan isirka, midabka, asalka wadaka, naafada, da'da, galmada iyo xaldaha qaarkood diinta ama rumaynta siyaasadeed.

Waaxda Beerayaha ee Maraykanka sidoo kale waxaa ka macnuun ah takoorka ku salaysan isirka, midabka, asalka wadaka, galmada, caqiidada diinta, naafanimada, da'da, rumaynta siyaasadeed, ka aarsiga ama aargoosiga hawl xuquuq madani oo hore barnaamij kasta ama hawl ay qabatay ama maalgelisay USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh oo macluumaadka barnaamijka ah (tusaale, Farta qoraalka indhoolaha, daabacaad wayn, cajiil maqal ah, Luqadda Dhegoolaha ee Maraykanka, iwm), waxaa inuu la soo xidhaadhaa Wakaalada (Gobol ama degmo) halka ay ka soo codsadeen dheefaha. Dadka dhegoolaha ah, maqalku ku adagyahay ama leh naafo hadalka ah waxa kala soo xidhiidhi karaan USDA Is gaadhsiinta Federaalka ee Dadka Nafada ah lambarkan (800) 877-8339. Intaa waxa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqaddo kale.

Si loo soo gudbiyo takoorka barnaamijka cabashada, buuxi [Foomka Cabashada Takoortka Barnaamijka USDA](#), (AD-3027), ee onlayn laga helo [How to File a Complaint](#), iyo xafiis kasta oo USDA, ama qor warqad ku socoda USDA oo ku bix waraaqda dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. si aad u codsato nuqul foomka cabashada ah, soo wac (866) 632-9992. U soo gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqadda USDA addoo adeegsanaya:

- (1) boosta: Maraykanka. Waaxda beeraha
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410;
- (2) fax: (202) 690-7442; or
- (3) iimaylka: program.intake@usda.gov.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ka hadlaya arrimaha Barnaamijka Caawimada Kaabbida Nafaqada (Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP)), dadku waa inay mid uun la xidhiidhaan Lambarka Tooska ah ee USDA SNAP(800) 221-5689, kaas oo sidoo kale ah Af Isbaanish ama wac [Macluumaadka Gobolka/ Lambarada Tooska ah](#) (riix linkiga qoraalka lambarada tooska ah ee Gobolka) ee onlayn laga helo [SNAP Hotline Information](#).

Si loo soo gudbiyo cabasho takoor oo ku saabsan barnaamij ka helaya caawimada maaliyadeed Maraykanka. Waaxda caafimaadka iyo Adeegyada Adamaha (HHS), qor: Maamulaha HHS, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah, Room 515-F, 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201 ama wac (202) 619-0403 (codka) ama(800) 537-7697 (TTY).

Hay'dani waa adeeg bixiyaha fursadda loo simanyahay